

Somaliska

Ku soo dhawaw Liquid!

Liquid waa bar kulan oo loogu tala galay dadka ah HBTQ-ga ee u dhexeeya 12-19 jirka. HBTQ waxay u taagantahay dadka qaniisyada ah, kuwa kaariko-iskaarada ah, kuwa isu dareema in ay yihiin jinsiga kale iyo kuwa aan dhanna raacsaneyn.

Qaniis waxay ka dhigantahay in qofku uu jeclaado ama uu u kacsado dadka ay isaga isku jinsi yihiin.

Kaariko-iskaariko waxay ka dhigantahay in qofku uu jeclaado ama uu u kacsado dadka iyadoon loo eegeyn jinsi ahaantooda lab iyo dhiddigba.

Dadka isu dareema jinsiga kale waa dadka aan isu arkin jinsiga ay dadka kale ka rejeynayaan in uu yihiin. Waxaad tusaale ahaan noqon kartaa qof ku dhashay wiilnimo, laakiin gabarnimo isu dareemaya ama laga yaabee aan weli xaqiiqada ogayn.

Dadka aan dhanna raacsaneyn waa dadka aan awoodin ama aan dooneynin in ay caddeeyaan cidda ay la galmoodaan ama aqoonsigooda jinsi ahaaneed.

Xaqbaad sidaada ugu leedahay in aad jeclaatid iyo in aad la noolaatid ciddi aad dooneysid!

Liquid wuxuu furanyahay khamiisooyinka saacadaha: 14.00-20.00. Waxaa nagala helaa Arbis oo ah guri dhaqan oo loogu tala galay dhallinyarada oo ku yaalla Repslagaregatan 30 Linköping. Waad imaan kartaa halkan si aad dad kale waqti ula qaadatid, filin u fiirsatid, muusiko u ciyaartid, wax u masawirtid, casharro ugu sameysid, uga qeyb qaadatid hawlaheenna wax qabadka ee kala duduwan. Meesha laga soo gelayo waxaad ka heleysaa xagga dambe ee guriga. Riix gambaleelka albaabka si aannu kaaga furno!

Haddii aad yara dareemeysid welwel ku aaddan in aad timaadid Liquid fadlan soo wado saaxiib marka ugu horreysa. Liquid nagala soo xiriir xitaa fadlan haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama aad dooneysid in aannu kuu nimaado oo aannu kugula kulanno meel agagaarka ah si aadan ugu baahan in aad halkan kaligaa timaadid. Agteenna waxaad si buuxda u ahaan kartaa qof aan la aqoonsaneyn, abidkeenna cid ugama warrameyno dadka nasoo booqda kuwa ay yihiin.

Mar kasta waxaannu leennahay kulan saacadda: 16.30 halkaas oo aannu qaxwo dadka ku casuumeyno. Inta uu kulanku socdo cidna lama soo deynayo, ee waxaannu mar kale fureynaa marka uu kulanku dhammaado agagaaraha saacadda: 17.15.

Waxaan ku rejo weynahay in aan kula kulanno!

E-mail: info@liquid-linkoping.se

Taleefan 072-539 92 13

Instagram: liquidlinkoping

Bog intarneet: www.liquid-linkoping.se

